



Victim First

Leicester, Leicestershire & Rutland

SOMALI

Victim First waa adeeg bilaash ah, madax-bannaan, oo qarsoodi ah, kaasoo taageeraya dhibanayaasha iyo markhaatiyaasha dambiyada ee ku sugan Leicester, Leicestershire, iyo Rutland. Mudnaanteenu waa inaan hubinno inaad hesho taageerada lagama maarmaanka ah ee kaa caawin karta inaad la qabsato oo soo kabato.

Waxaan aqoonsanahay in baahiyaha qof kasta ay kala duwan yihiin, taasoo sababtay in adeeggeenu uu noqdo mid loo qaabeyn karo si uu ugu habboonaado baahiyahaaga, iyadoo taageeradu lagu siin karo si toos ah ama telefoonka.

Haddii dambigu la soo sheegayo ama aan la soo sheegin, iyo xitaa haddii uu dhacay waqti ka hor, waxaan leenahay koox shaqaale khibrad leh oo xirfad leh oo kaa caawin doona safarkaaga soo kabashada.

Victim First waxay bixisaa adeegyada taageerada soo socda:

- Taageero nafsaani ah si aad ula qabsato oo uga soo kabato dambiga
- Macluumaad ku saabsan hay'adaha kale
- Talooyin ku saabsan Ka Hortagga Dambiyada
- Taageero gacmeed sida alaarm shakhsi ah ama alaarm daaqad/alaarm albaab
- Xiriir soo celin ah oo u dhexeeya dhibanaha iyo dembiilaha
- Taageero carruurta iyo dhallinyarada

Haddii aad rabto inaad hesho caawimaad adigoo adeegsanaya turjubaan, waxaad sameyn kartaa mid ka mid ah:



Naga soo wac 0800 953 9595 (waxaan kuu diyaarineynaa turjubaan luqaddaada), ama;



Nagu soo dir email victimfirst@catch-22.org.uk



Waxaan furnahay Isniinta ilaa Sabtida saacadaha 9am ilaa 6pm. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo www.victimfirst.org.



@Victim1st